

Warbixin ku saabsan suubinta baaritaanka qaaxada oo qeybt dumarka uurka leh

Qaaxada (TB) waxey kamid tahay cudurada infekshanka oo waxaa sababo bakteeriyada qaaxada. Bakteeriyadaas badanaa waxey sabab u tahay infekshanka sambabaha, laakin waxey xitaa saameynkartaa jirka qeybahiisa kale. Dadka oo ku xanuunsanaayo qaaxada sambabaha weey faafin karan qaaxada markasto ey qufaxaan oo bakteeriyada hawada bey soo raaci. Dhammaan dadka lagu daarto qaaxada waxey cudur ku noqotaa boqolkiiba 10, ama 10%. Dhammaan inta kale infekshanka jirkooda wuu ku jiri laakin wax xanuun kuma saameynaayo oo weey ka caafimaad qabaayaan. Waqtigii lagugu daartay muddo dheer ka hore bey ahaan kartaa. Maanta waxa la hayaa daawooyin oo qofka qaaxada ka daaweynaayo.

Wadamo badan bey qaaxada aad ugu badantahay. Sanadkasto Iswiidhan waxey qaaxada ku dhacdaa 500 oo qof, oo inta kugu badan dadkaas waa muhaajriin oo waxey ka imaadeen wadamada ey ku badan tahay qaaxada. Haddii qof dumar ah lagu daarto qaaxada (infekshanka jirka kugu nasanaayo) oo ey uur qaado waxaa halis ah iney ayada ku dhaco cudurka qaaxada lix bilood kadib markey canuga dhasho. Qaaxada sambabaha haddii hooyada ey ku xanuunsato waxey halis galin caafimaadka canuga yar oo si fudud buu ku qaadi qaaxada oo wuxu ku noqon karo cudur noloshiisa halis galiyo.

Sidaas daraadeed baa kula talinaa dumarka uurka leh, oo ka imaadeen wadamada ey qaaxada ku badan tahay midkood, waa iney iska baaraan qaaxada inta ey uurka lee yihiin. Waxaa laga qaadi dhacaan dhiig markaa booqasho ugu imaatid kaalkaalisada dumarka. Dhacaankaas waxa laga arki kara haddii bakteeriyada qaaxada ey jirkaada ku jirto. Haddii dhacaanka laga arko wax tilmaamaayo in jirkaada bakteeriyada qaaxada xambaarsanyahay waxaa laguu gudbin dhakhtar qaas ah oo isbitaalka qeybta infekshanada iyo sambabaha.